

Collecting a Urine Sample (Somali)

Marka la qaadayo baaritaan kaadi


Waxaa lagu siiyay caag yar oo loogu talagalay in looga soo qaado kaadi (wee) ilmahaaga si looga baaro infekshanada iyo wixii kale oo jiri kara.

Hubi in kaadida aysan noqon mid wax taabteen (contaminated) marka la qaadayo (tusaale ahaan taabashada maqaarka) sababtoo ah tani waxay saamayn kartaa natiijada baaritaanka waxayna horseedi kartaa natiijo khaldan.



Tallaabooyinka loo baahan yahay in la sameeyo marka si nadiif ah kaadi loo qaadayo

1. Diyaarso weel ay ku jiraan biyo nadiif ah oo aan jeermis lahayn, qalab yar oo wax lagu soo qabto oo loo yaqaan tweezer, iyo faashad, suufka kubadda camal ah ama kan dhallaanka dabada looga masaxo.
2. Si fiican u dhaq gacmahaaga (waxaad xiran kartaa galoofyada haddii aad rabto).
3. Hubi inaysan cid kale arkeyn ilmahaaga inta aadan ka bixin xafaayadda ama surwaalka hoose si xubintooda taranka loo arko (waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad ku fadhiisiso ama aad shukumaan ku seexisid ilmahaaga).
4. Isticmaal qalabka wax lagu soo qabto ee loo yaqaan (tweezer) si aad ugu soo qaadid faashada/kubada suufka ah/kan dhallaanka dabada looga masaxo oo ku qooy biyo nadiif ah.
5. Adigoo u isticmaalaya tweezer ka wax lagu soo qabto inaad kusoo qabato faashad qoyan/kubada suufka/kan dhallaanka lagu masaxo, si tartiib ah u dhaq aagga taranka:
 - **Gabdhaha:** Ka masax xubinta taranka dhowr jeer adoo ka bilaabaya horay kuna dhameynaya gadaal, adigoo isticmaalaya faashad/kubad suuf ah/kan dhallaanka lagu masaxo markasta.
 - **Wiilasha:** Ka masax madaxa xubinta taranka adigoo isticmaalaya faashad/kubad cudbi ah/kan dhallaanka lagu masaxo markasta.
6. Ha u oggolaan in maqaarkaaga ama gacmaha ilmahaaga ay taabtaan meesha la nadiifiyey.
7. Dabci furka jaalaha ah ee caaga lagu qaadayo (laakin daboolka haka furin).
8. Daawo oo sug ilaa ilmahaagu bilaabay inuu kaadiyo.
9. Marka kaadidu bilaabato, ka fur furka oo dhig caaga kaadida lagu qaadayo kaadida socota hoosteeda. Caaga ka fogee ilmahaaga (ha u ogolaanin inuu maqaarkooda taabto). Ha taaban gudaha caaga ama (wiilasha) ha gelin guskooda caaga gudahiisa.
10. Marka ay yaraan ku dhacdo caaga kaadida lagu qaadayo qaando mugeed oo kaadi ah furka si fiican ugu dhuuji oo sii kalkaalisada.
11. Qalaji xubinta taranka ee ilmahaaga oo ka beddel xafaayadda ama surwaalka hoose.



Haddii aad guriga uga qaadid kaadida, waa in lagu kaydiyaa talaajadda oo la geeyaa shaybaadhka 24 saacadood gudahood.



Talooyin waxtar leh

- Ha bilaabin kaadi qaadista isla marka uu ilmuhu bilaabo kaadida. Qaad marka ay kaadida bilaato ka dib.
- Si uu ilmuhu u kaadiyo, si tartiib ah ugu salaax ilmahaaga caloosha dhowr daqiiqo adigoo isticmaalaya faashad nadiif ah oo lagu qooyay biyo qabow.
- Ilmahaaga sii caano ama nuuji naaska inta aad sugayso inay kaadiyaan.
- Caruurta waaweyn ee loo tababaray musqulaha, marka hore masax qoyan ku tirtir.
- Usheeg gabdhaha inay fariistaan iyagoo usii jeesanaya dhinaca musqusha - tani waxay u sahlaysaa waalidiinta/daryeelayaasha inay kaadida qaadaan.

Waxaa soo saartay Waaxda Gurmadka Degdegga ah, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Waxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryeelayaasha. **Resource ID:** FS091
Reviewed: July 2022 Cudur-daar: Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyadoo loogu talagalay in tilmaame ahaan kaliya loo isticmaalo waxaana loogu talagalay in lagu taageero, ee aan lagu beddelin, wadhadalka lala yeelanayo dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa, markaa fadlan hubi inaad tixraacayso nuulkii ugu dambeeyay.